



Way fiicantahay in la ogaado marka isbitaal la booqanayo

Haddii aanad si fiican u aqoon af Iswiidhishka, waxa aad xaq u leedahay turjumaan. Codso turjumaan marka aad qabsanayso wakhti.

Marka lala xidhiidhayo daryeelka caafimaadka ee Iswiidhan, waxa jira arrimo ay habboontahay in maskaxda lagu hayo. Waa arrimo ka dhigaya booqashadaada mid guulaysata, daryeelka aad helaysaana uu sax noqonayo. Haddii aad tahay bukaan iyo haddii aad booqde tahayba waxa jira waajibaad lagaa rabo iyo xuquuq aad leedahay. Daryeelka caafimaadka ee Iswiidhan wuxu u dhaqmi karaa si ka geddisan sidii aad ku taqaannay waddankaagii.

Turjumaanku wuxu qayb aad u muhiim ah ka yahay booqashadaada caafimaadka

- U sheeg dhakhtarka ama neerasta ku gudbinaysa haddii aad rabto turjumaan, kuna wargeli haddii aad rabto nin ama naag turjumaan ah. Sidoo kale wargeli haddii aad rabto dhakhtar nin ah ama naag ah.
- Ha u adeegsan carruurtaada turjumaan ahaan.
- Marka aad booqanayso isbitaalka, iska ilaali in ay dad badani kuu soo raacaan qolka baadhitaanka. Kelidaa imow ama ugu badnaan ayadoo qof kale ku weheliyo, turjumaanka mooyaane. Si booqashadu adiga bukaan ahaan ay ahmiyad gaar ah kuu siin karto.

Haddii ay suurtagal tahay diyaarso cid carruurta kuu haysa si booqashadaada isbitaalka xoogga loogu saaro daryeelkaaga caafimaad iyo si aad uga baaqsato wax kale oo ku mashquuliyaa.

Marka aad ku timaaddo bukaan ahaan

Dhakhtarka xarunta xannaanada caafimaadku waxa uu gudbintaada u soo qorayaa isbitaalka iyo khabiirada. Markaas ka dib waxa aad helaysaa ballan iyo wakhti aad soo booqato isbitaalka. Xasuusnow in aad soo qorato magacyada dawooyinka aad isticmaasho amaba u soo qaado isbitaalka.

- Marka aad timaaddo Qaabilaadda iska xaadiri meesha lacagta laga bixiyo, adiga oo tusaya warqaddii ballanka. Waxa aad tustaa kaadhkaaga aqoonsiga, kaadhkaaga qarashka badan iyo kaadhka bilaashka. Ku bixi kaadh-bangi ama ku xidhan nadaamka autogira-da, si dhammaan kharaashkaaga daryeelka caafimaadka ee Landstinget-ka si toos ah looga jaro akoonkaaga. Waxa kale oo aad ku bixin kartaa warqadda qaan-sheegadka oo laguugu soo dirayo guriga. Kaash ku bixintu waxa ay joogsatay 1 maarso 2010.

Haddii aad ku qasbanaato in aad raadsato qaabilaad degdeg ah, waxa habboon in aad telefoon iska soo horraysiiso. Haddii dhakhtarka lagu dhigo oo ay dhakhtar ku jiriddaadu dhibaato ku keento qoyska iyo dhaqaalahaba, waxa aad taageero ka heli kartaa la taliye xagga bulshada ah. Ka codso shaqaalaha Qaybta in ay kaa caawiyaan xidhiidhkaas.



Landstinget

i Östergötland

Bra att veta vid sjukhusbesök/SOM

Wakhtiyada

Iswiidhan waa muhiim in la ilaaliyo wakhtiga. Taasi waa ay habboontahay in la sii ogaado si looga fogaado isfahan la'aan.

- Ha illoobib in aad goor hore baajiso wakhtiga aanad rabin, si aad uga baaqsato in lagaa soo dalbado qarashka bukaanka iyo si ay dad kale uga faa'iidaystaan wakhtiga
- Adigu ka sheeke dhibaatada ku haysa, kana jawaab su'aalaha shaqaalaha caafimaadka. Xoogga saar xanuunka aad wakhtiga u qabsatay.

Marka aad ku timaaddo booqasho ahaan

Marka aad booqanayso isbitaal waxa muhiim ah in la tixgeliyo bukaannada iyo booqdeyaasha kale. Ha booqan isbitaalka haddii aad hargabsantahay. Soo wac oo warayso talobixin. Isbitaalka waa ka mamnooc sigaar cabbiddu.

- Marka la booqanayo isbitaalka waxa habboon in tixgelin la siiyo wakhtiyada booqashada, lana ixtiraamo caadooyinka shaqo ee isbitaalka iyo xilliyada cuntada la caadaystay. Sidoo kale tixgelin sii bukaannada kale raaxadooda.
- Xaaladaha khaaska ah iyo haddii aanad qabsan karin cid carruurta kuu haysa, ka codso cidda kula socota in ay carruurta kuugu hayaan maqaayadda ama qolka sugitaanka.
- Ha illoobin in aad gashato bacda kabaha lagu ilaaliyo marka loo baahdo.
- Soo qaado shukulaato, khudrad ama joornaal halkii aad ka soo qaadan lahayd ubaxyo, ayadoo la fiirinayo dadka xasaasiyadda qaba iyo kuwa asmada qaba.
- Ayadoo la tixgelinayo dadka qaba xasaasiyadda iyo asmada, waxa fiican in laga fogaado cadarka adag iyo waxyaalaha cadarka leh.

Iswiidhan si wanaagsan ayey qofka u gacan qabtaan shaqaalaha isbitaalku . Maskaxda ku hay qofkan aad booqanaysaa in uu ahaan karo mid aad ugu baahan caawimo weyn marka uu yimaaddo guriga ee uu ka yimaaddo isbitaalka.